# Barnaamijka Kaamirada Xawaaraha ee Goobta Shaqo

Wax ka ogaw Barnaamijka Kaamirada Xawaaraha ee Goobta Shaqo, sida uu ku yimid iyo faahfaahin ku saabsan sida barnaamijka loo dhaqangalinayo.

Sanadihii u dambeeyay, waxaa jiray koror ku yimid ugu wadista baabuurta si aan badqab la'aan ah wadooyinkayaga. Intii lagu jiray Kalfadhiga Sharci-dejinta Gobolka Washington ee 2023, waxaanu codsanay sharci lagu isticmaalo kamaradaha xawaaraha ee goobaha shaqada ee gobolka. Sharcigu wuxuu dhaqangalay Luulyo 1, 2023, kamaraduhu waxaa lagu xiri doonaan goobaha shaqada laga bilaabo horaanta 2025.

Ujeedada barnaamijkani waa in la yareeyo xawaaraha darawalada ee goobaha shaqada ka socoto. Tani waxay kordhin doontaa badqabka waxayna badbaadin doontaa nolosha.

Barnaamijkan waa wada shaqayn ka dhaxaysa hay'ado dawladeed oo badan:

- Washington State Department of Transportation (WSDOT) waxay maamushaa hawlgalada iyo maamulka
- Washington State Patrol waxay maamusha fulinta
- Office of Administrative Hearings wuxuu maamulaa maxkamadaynta xadgudubyada

Hay'adahani waxay sidoo kale la shaqaynayaan Washington State Department of Licensing, Washington Traffic Safety Commission iyo ururada kale ee ay ka go'an tahay badqabka.

## Sida ay u shaqayso

Barnaamijkayaga Kaamerada Xawaaraha ee Goobta Shaqada ayaa isticmaali doona iskaanka ogaanshaha Iftiinka iyo kala duwanaanta, oo sidoo kale loo yaqaan Dareemitaanka nalka iyo Kala fogaynta (Light Detection and Ranging, LiDAR), ogaanshaha xawaaraha gaariga. Tignoolajiyada iskaan garayna LiDAR waxay si sax ah u ogaan kartaa xawaaraha baabuurta badan ee ku socda dhawr haad ee labada dhinac ee laamiga oo si toos ah u socda. Iskaan garaynta LiDAR waxay u shaqaysaa iyada oo soo saarta iftiin ku wajahan jihada gaariga oo diirada u saaran, kuwaas oo aan saamayn ku yeelanayn aragga darawalka, xaga gaadhiga iyo wakhtiga inta ay qaadanayso in iftiinku dib ugu soo noqdo qalabka. Iyadoo xisaabinaysa wakhtiga ay qaadanayso qabashada iftiinka inuu soo laabto, aaladaha LiDAR waxay si sax ah u ogaan karaan xawaaraha gaariga.

Baabuurta xawaaraha dheer ku socda waxaa lagu qabtaa iyadoo la isticmaalayo sawiro, kuwaas oo ay dib u eegaan ciidamada Ilaalada Gobolka Washington. Haddii askariga dib u eegista ahi uu go'aansado in xadgudub dhacay, askarigu wuxuu saxeexi

doonaa ogaysiis xad-gudb ah si loogu diro mulkiilaha gaariga 30 maalmood gudahooda ee xadgudubka.

## Saxnaanta kaamarada xawaaraha

Nidaamka waxaa la tijaabin doonaa maalin kasta si loo hubiyo in qeybaha dareema gaariga, kamaradaha iyo kombiyuutarada ay sax yihiin. Natiijooyinka baaritaanka waxaa falanqeyn doona farsamo-yaqaano. Hadii ay wax khalad ahi dhacaan, maamuluhu waxa uu joojin doonaa hawlaha fulinta ilaa khaladaadkaas la xaliyo.

## Ganaaxa xadgudubyada

Ganaaxa Barnaamijka kamarada Xawaaraha ee Goobta Shaqada, ee uu dejiyey sharci-dejinta, waa $0 xadgudubka koobaad; iyo $248 xadgudubka labaad iyo xadgudub kasta oo ka dambeeya. Lacagta laga soo aruuriyo ganaaxyada waxaa lagu dabaraa kharashyada la xiriira Barnaamijka Kamaradaha Xawaaraha goobta Shaqada sanadka soo socda (kharashka hawlgalka iyo dayactirka) iyo sidoo kale ballarinta barnaamijka (haddii la damaanad qaado). Dhamaan lacagaha kale waxaa loo qoondayn doonaa Ilaalada Gobolka Washington ee Baabuur Waditaanka Qofka oo Khamraysan xoojinta roondooyinka iyo barnaamijyada waxbarashada badqab ahaaneed.

## Waa maxay sababta barnaamijka loogu baahan yahay

Shaqaalaha goobaha shaqada iyo kuwa ka jawaabaya xaaladaha degdegga ah oo aad u tiro badan ayaa la kulmay wicitaano dhow, dhaawacyo halis ah iyo dhimasho ka dhaca goobta shaqada ee calaamadaysan mana ahan oo keliya shaqaalaha wadooyinka khatarta ku jira. Ku dhawaad 95% dadka ku dhaawacmay shilalka ka dhaca goobaha shaqada waa darawalo, rakaabkooda ama dadka lugaynaya goobaha u dhow. Qof kasta ayay danta ugu jirtaa in uu fiiro gaar ah u yeesho oo uu si badqab leh ugu wado gaariga goobaha shaqada.

## Hab-dhaqanka khatarta ah ee sii kordhaya, isbadalada khatarta ah

U wadista gaariga si khatar ah ayaa ku soo badanaysa wadooyinka. Baabuurta qaar waxay u safraan si ka dhakhso badan sidii caadiga ahayd, iyaga oo khatar gelinaya shaqaalaheenna – iyo qof kasta oo kale oo waddda ku jira. Badqabka goobta shaqadu waxaa ku jirtaa danta ugu wanaagsan ee QOF KASTA oo wadada maraya.

Tirada shilalka dilaaga ah ee ka dhacay goobta shaqada ee Washington ayaa kordhay shan shil sanadkii 2022 ilaa sideed shil sanadkii 2023. Waxaan sidoo kale aragnay kororka tirada guud ee wadarta shilalka ka dhaca goobta shaqada ee wadooyinka Washington dhowrkii sano ee la soo dhaafay:

- 2020: 1,149
- 2021: 1,363

- 2022: 1,313
- **2023: 1,377**

Sadexda sababood ee ugu sarreya ee shilalka ka dhaca goobaha shaqada waa laga hortagi karaa. Waxay si dhow ula xiriiraan, xawaaraha xad dhaafka ah iyo feejignaan la'aanta/waditaanka gaari qofka oo mashquul ah.

Waxaan ka codsanaynaa dhamaan darawalada goobaha shaqada inay:

- **Xawaaraha Dhimaan** - ku wad xawaaraha lagu dhajiyay, waxay halkaas u joogaan badqabkaaga
- **Noqo mid naxariis badan** - Shaqaalaheennu waxay kaa caawinayaan inay ilaaliyaan badqabkaaga oo ay hagaajiyaan wadooyinka
- **U feejignaw** - shaqaalaha ku hagaya iyo taraafikada hareeraheeda jooga labadaba
- **Isdaji** - filo dib u dhac, wakhti hore soo bax ama raac wado kale haddii ay suurtagal tahay; ma jiro kulan ama balan u qalma in qof naftiisa halis galiso